

Waxaad Ka Fekertaa Shaqo ah Daryeelid oo leh Mustaqbal

Ku raaxeyso shaqo ah daryeelka caafimaadka oo ah mid wax weyn ka beddeleysa noloshada dadka



Sida ay tahay marka dadka lagu caawinayo guryahooda iyo bulshada gudaheeda

Waayo dadka xirfadleyaasha ah ee sameeya daryeelka dadka ee guryaha?

Xirfadleyaasha daryeelka waxay caawiyaan carruurta iyo qaangaarka naafada ah, dadka u baahan daryeelka caafimaadka dhimirka iyo qaangaarka oo jooga guryahooda iyo meelo kale.

Maxay qabtaan xirfadleyaashan daryeelka sameeya?

Shaqadan waa mid ku saleysan dadka la caawinayo in lala yeesho xiriir ah is-aaminid iyo daryeel ah waxa ay rabaan. Xirfadleyaasha daryeelka waxa ay u qareemaan dadka, oo waa in ay ka fekeraan sidii ay caawinta uga sii dhigi lahaayeen mid tayo fiican u yeeleysa noloshada dadka.

Dadku waxa ay u baahan yihiin waa caawimaad kala ah hawlaha kariska cuntada, quudin, qubeys, labbis, isticmaalidda musqusha, sariir in laga soo dego oo lagu fariista kursiga curyaanka, in loo rogo dhinaca kale, guriga in looga shaqeeyo iyo hawlaha kale ee guriga.

Dadku waxay u baahan yihiin in lagu caawiyo barashada wax cusub, adeegsiga teknoolajiga caawinta ah, macaamilka bulsho ee wanaagsan ama in la xusuusiyo habdhaqanka fiican.

Dadku sidoo kale waxay u baahan yihiin caawimaad marka ay la joogaan dadweynaha, haddii ay aadayaan kulan dadweyne oo ay isu raacayaan qoyska iyo asxaabta, ballamaha caafimaadka ama ballamaha kale, dukaameysi ama hawlo kale. Waxa kale oo ka mid ah markay wax baaranayaan wax dan u ah ama ay dadka ku wargelinayaan waxyaabo iyo fursado laga heli karo deegaankooda. Waxa kale oo laga yaabaa in ay u baahdaan in lala aado safar yar ama dalxiis.

Xirfadleyaashan daryeelka waxay u baahan karaan in ay qofka ay caawinayaan ku kaxeeyaan baabuur, ama waxaa laga yaabaa in ay qofka ay caawinayaa la raacaan gaadiidka dadweynaha ee magaalada ka shaqeeya. Baahida gaadiidku waa mid ay ku kala duwan yihiin dadka la caawinayo. Xirfadleyaasha daryeelka badankoodu gaadiid u gaar ah ayey leeyihiin oo waxay u isticmaalaan shaqada: hase yeeshee, goobaha shaqada qaarkood ayaa haysta gaadiid balse waa in aad weydiiso marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada.

Hawshu waxa ay ku kala duwan tahay nooca shaqada iyo qofka la caawinayo. Xirfadleyaasha daryeelka waa in ay la qabsadaan sida ay dadka loo caawinayo u rabaan in ay ugu noolaadaan guryahooda: taas macnaheedu waa inay kala bartaan sida loogu kariyo cuntada, waxa ay ku madadaashaan, hagaajinta guriga iyo wixii kale oo ay dadku rabaan in guryahooda loogu dhex sameeyo marka la caawinayo ee lala joogo.

Sababta aad u tixgelineyso shaqada noocan ah

Waxaa laga yaabaa in aad ka hesho shaqada noocan ah haddii aad jeceshahay in aad dadka ula shaqeeyso si fool-ka-fool ah iyo in aad barato oo aad xiriir fiican la yeelato. Shaqooyinkan badanaa waxay noqdaan kuwa fudud marka la barato dadka la caawinayo. Haddii aad sameyso waxyaabo kale ama hiwaayad (farshaxan, muustiko, qurxinta beerta guriga, isboortis, iwm.), ku sheego wareysiga shaqada, waxaa laga yaabaa in loo baahdo aqoontaas. Waxa kale oo ay shaqadan ku fiican tahay in aad wax ka baran doonto dabeecadaha iyo dhaqamada dadka.

Shaqooyinkan badanaa wakhtigii la rabo ayaa laga shaqeyn karaa.

Goobaha shaqada badankoodu waxay bixiyaan tababarka muhiim ah.

[CareerForceMN.com/CaringCareer](https://www.careerforcemn.com/CaringCareer)

651-259-7500 – turjubaan ayaa loo diyaarinayaa qofkii naga soo socda

CareerForce waa goobta rasmiga ah ee Gobolka Minnesota looga raadsado tasiilaadka shaqada.

CareerForce[™]

Minnesota's Career Resource